# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened:- 09:53AM** **Hansard No.17/1** **28/01/2012**

***Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 17aad, waxaa ka qayb qaatey 16 mudane waxayna socotey hal maalin, Sabtidii 28/01/2012.***

1. **Md. Axmed Maxamed Kijandhe:-** ajendaha marka la sameynayo waa in Golaha laga qeybgaliyaa, oo hadii laga fursan waayo Gudoomiyayaasha Gudiyada laga qeyb-galiyaa si wixii ka diyaariya ay ugu soo daraan, sidoo kale Goluhu waa inuu yeeshaa calendar ama jidwal maalin walba wixii la qabanayo laga ogaado, si loogu sii xisaabtamo.

**Waxaan kaloo soo jeedinayaa** in goluhu gudagalo arrimaha xasaasiga ah ee taagan oo ajendaha lagu daraa, Gudidda Arrimaha Bulshada Xeerkii Ciyaaruhu diyaar nagama ah waxaa diyaar naga ah Xeerkii Saxaafada ee halagu soo badalo kaas.

**Point of correction:-** kal-fadhigii hore Gudiddu waxay ku doodeysay in Xeerkii ciyaaruhu ka diyaaryahay oo lagu daro ajendahah.

2. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir:-** anigu waxaan odhanlahaa mar hadii fasax laga soo noqdey waa in marka hore:-

- warbixinada Gudiyada iyo shirgudoonka la dhageystaa
- wixii ajendihii hore ka qabyo ahaa waa in lagu xejiyaa
- Xeerka Maamul Wanaaga iyo La-dagaalanka Musuqa isna halagu soo daro.
- Xeerka Nabadgalyada Wadooyinka iyo Xeerka Biyaha ee la soo celiyay waa in lagu sii xejiyaa, wixii intaa ka danbeeya wixii soo kordha sidey u kala horeeyaan baynu ugaleynaa.

3. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** anigu waxaan taageersanahay sida ajenduhu u qoran yahay waxaan odhan lahaa Qodobka ah Miisaaniyada Qaranka wali la inooma keenin, inay soo dhowdahayna ma muuqato, markaa waxaan ka dhigi lahaa iyada xaga danbe, aadna way u habsaantey oo waxaa fiicnaan lahayd in waraaqo wareegto ah la sii

qeybiyo oo la yidhaahdo 30% miisaaniyadii hore ah halagu sii dhaqmo inta miisaaniyada la keenayo, intaa kale waxaan u soo kala horeysiinayaa ajendaha sidan:-

- Xeerka Baanka dhexe haloogu soo horeysiiyo
- Xeer-hoosaadka ajendihii horena wuu ku jirey, markaa ha sheegaan Gudidda joogtadu halku ku danbeeyay oo isna halagu soo daro.
- Xeerarka kale sida Xeerka Hilibka waa in mudnaanta laga siiyaa Xaalada dalka sida dhaqaalaha, Aminiga, Miisaaniyada iyo arrimaha barriga oo mudnaanta kowaad laga siiyaa.

4. **Md. Ibrahim Mahdi Buubaa:-** anigu waxaan qabaa in ajendahani uu aad u haboonyahay, waxaan ku soo dari lahaa Marka warbixinada la dhageysto waxaan ku xejin lahaa:-

   - Xaalada dalku marayo waxaan soo galin lahaa ajendaha Siyaasada Arrimaha Dibada dalku halkey mareyso iyo qaabka shirka looga qeybgalayo oo waa in siyaasada arrimaha dibadda dariiq cad loo jeexaa,
   - Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka baanka oo diyaara waa mid aad loogu baahan yahay
   - Xeerka Ciyaaraha oo ah xeer aad muhiim ugu ah dhalinyarada oo aan ahayn xeer siyaasadeed ee technical oo waa mid kor u qaadaya isdhexgalka dhalinta.
   - Xeerka Biyaha isna waa muhiim in la galaa.

5. **Md. Cali Xasan Maxamed:-** runtii ajendaha waxaa ku qoran xeerar muhiima, waxa wanaagsan in xeerarku sidey u kala muhiimsan yihiin loo kala horeysiiyo, Xeerarka degdeg loogu baahan yahay ee la inaga sugayo aynu ka hor shaqeyno, tan miisaaniyada iyadoon wali la inoo keenin wakhti go'an aan loo qaban, waxaan odhan lahaa waxaynu ansixiney xeerkii Miisaaniyada oo cayimayay marka la keenayo miisaaniyad, markey Golayaasha Wasiirada la horgeynayo iyo heerarkey soo mareyso oodhan, xeerka isna hiligii doorashada bishii june baa la inagu soo celiyay, marka waxaan soo jeedin lahaa Xeerkaa Miisaaniyada dib aan u eegno, iminkana workshop baan u

qabaneynaa oo xildhibaanada aqoonta u leh waan ku casuumidoonaa, ka dibna Golahan horkeeni doonaa.

Tan kale, waxaan odhan lahaa inteynaa cidkale qiimeyn, inagu horta aynu iska bilowno, waxaana fiican qofku haduu wax qiimeynayo oo daacad ka tahay inuu naftiisa ka soo bilaabo, waad ogtihiin oo 3 casho wuxuu la furmi waayay kal-fadhigu Kooram la'aan, waana la wada joogey Magaalada, markaa inteynaan cid kale qiimeyn aynu is qiimeyno oo ajendaha aan ku darsano in Goleheena aynu qiimeyno.

6. **Md. Siciid Cilmi Rooble:-** anigu waxaan odhan lahaa horta waa in sharci lagu wada socdaa oo la dhowraa sharciga, xeer-hoosaadkii loo codeeyay ee ajendihii hore ku jirey waa in lagu soo daraa ileyn ajendihii hore ayuuba ku jireye,, sidoo kale

   - Xeerka Miisaaniyada Miisaaniyada waan tageersanahay waa isna lagu soo daraa,
   - Xeerka Bangiga dhexe waa inuu iaga baxaa oo ajendaha ku darnaa, waayo hadii xeerka bangiga dhexe la waayo xeerarka kale ee bangigu ma hirgali karayaan.

7. **Md. Maxamud Axmed Obsiiye:-** Masuuliyada kowaad ee Goluhu waa ansixinta iyo dejinta Xeerarka dalka, markaa anigu ajendaha waxaan u kala horeysiinayaa sidan.

   - Warbixinta wax qabadka Golaha iyo Gudiyada waa in lagu soo daraa oo loogu horeysiiyaa, oo wax qabadkii Golaha la soo bandhigaa isagoo qoraala.

   - Waxaan ku darayaa Sibaab xidhkii, waayo marka Miisaaniyada la keenayo waa in Xisaab xidhkii horena la keenaa.
   - Looma baahna in Xukuumada laga hordhaco, shirka London anigu waxaan qabaa xukuumadey u taal cidda iyo strategyada siyaasadeed ee ay la tageyso oo madaxweynaha ayaa cid u igmanaya, inaga warbixin ayaynu ka rabnaa ka Gole ahaan.

8. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** anigu waxaan odhan lahaa ajenduhu aad buu u fiicanyahay, waxaan qabaa in sidiisa lagu ansixiyo, waxaan ku darayaa waa inaynu taageernaa oo lacag ku taageernaa

Ciidanka Qaranka oo shir-gudoonku intuu soo qiimeeyo la inaga jaraa si aynu u dhiirigalino, sidoo kale waa ina booqdaa oo la tagaa Jiida hore si loo soo qiimeeyo, waxaan leeyahay ciidanka qaranku wuxuu hayaa hawl culus ilaahay ha ku guuleeyo.

9. **Md. Xaashi Xuseen Caabi:-** anigu ajendaha waxaan odhan lahaa:-

- Xaalada dalku marayo ha loogu soo horeysiiyo, oo qiimeynta Xaalada dalka dhinacyada Nabgalyada, Dhaqaalaha iyo Nolosha, waayo wali maynaan ka hadlin xaalada dalku marayo, markaa qodobkaa ayaan ugu soo horeysiinayaa.
- Xeerka Baanka dhexe isna ha la soo de-dejiyo, waayo aad baa loogu baahanyahay.
- Xeerka Iibka Hilibka maan garan anigu waxa loola jeedo, Xeerar ka muhiimsan baana jira.
- Xeerka Biyaha Qaranka markii hore weynu ansixinay oo madaxweynahaa soo celiyay isagana waa inaynu jaleecnaa.
- Sidoo kale safarka Madaxweynahah oo aad loogu dawakhsanyahay, taa waxaan odhan lahaa ha loo daayo Madaxweynaha.

10. **Md. Xamse Maxamed Gaadaweyne:-** anigu ajendaha waxba ka odhan mayo, waxaan kaliyoo ku darayaa Xaalada dalka waa inaynu eegno, waa mid u baahan in la qadariyo oo aynu eegno bal waxay hal inala tahay ka gole ahaan, waxaan kaloo odhan lahaa Jaraa'idku dadka ayay kala fogeynayaan, markaa yaanay dadka kala fogeyn, waa iney ka fiirsadaan waxay qorayaan waayo waa xaaraan in laga beensheego dadkeenii oo dagaalamaya, sidoo kale shirka London waa qodobkale oo u baahan in laga hadlo, ajenduhuna waa noqdaa wax dhadhamaya.

11. **Md. Jaamac Xasan Aadan:-** waxaan ku dari'lahaa oo kaliya anigu:-

- Qiimeynta Xaalada Dalka, waayo xaalado dagaal baa jira iyo shirka londonba.

- Heshiiyadii la galay, waxaa jira heshiisyo xukuumadu gashay oo aan golaha la horkeenin, iyana waa lagu daraa oo xukuumadu keentaa.

12. **Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable):-** marka ajendaha la sameynayo, marka hore waa in Gudidda Joogtada laga qeybgaliyaa, ileyn intii fasax lagu jirey iyagaa golaha ka masuul ahaaye oo xogogaal ah dad badana la kulmey duruufaha jirana markaa wax kala socda, sidoo kale Gudoomiye ninkii inoo yimi safiirka ahaa waad la shirteen markaa taana waa inaad warbixin naga siisaan, ajendahana waxaa ku dari lahaa:-

    - Wax ka-badalka Xeer-hoosaadka waa in lagu soo daraa.
    - Sidoo kale Qadiyada barriga waa in islaax lagu dhameeyaa oo laga wada kulmaa, waana dadkeenii, khalad fahan baa jiree.
    - Xeerka Baanka dhexe waa inaynu dhameynaa oo ansixinaa isna aad buu muhiim u yahaye.
    - Lacagaha Hay'daha NGOs loo dhiibayo waa in qiimeyn lagu sameeyaa oo lagu daraa Ajendaha.

13. **Md. Maxamed Jaamac Cabdi:-** waan u mahadnaqayaa Shir-gudoonka iyo Xoghaynta oo wax wanaagsan soo qabtey, waxaan ku darayaa anigu ajendahan:p-

    - Xisaab xidhkii in la keeno si loo ansixiyo Miisaaniyada,
    - Heshiiyada Xukuumadu gashay waa inay Golaha horkeentaa, sidoo kale Barnaamijyada dawlada si loo ansixiiyo waa inay Golaha keentaa.
    - Xaalada dalka, sida shirka London, maraaxisha dalku marayo oo dagaalada barriga ka jira la eegaa, shirkan londona waa inay xukuuumadu keentaa labada gole oo awood u leh, dagaalkuna wuxuu ka dhex socdaa dad

muwaadiniin ah oo la khaldey, markaa sidii loo dhameyn lahaa waa in laga wada tashadaa.

**14. Md. Maxamed Saalax Cige:-** ajendaha waxaan ku darayaa ugu horeyn:-

- Xaalada dalka marayo, sida dagaalada bariga ka socda, shirka London iyo heerka mashiishadu mareyso.
- Wax ka-badal lagu sameeyo Xeerarka Cashuuraha oo dhibaato badan ka jirto, dadkii xeerku qabanayay ayaanba fahansanayn oo waynu ogeyn murankii shirkadaha iyo Wasaarada Maaliyada.
- Heshiiyada Dawladu gashay waa in Golaha la horkeenaa, ajendahana lagu soo daraa, Xeerarkan faraha badan ee meesha ku qoran waxaa ka muhiimsan oo ay tahay in intaa la eego marka hore.

**15. Md. Mataan Hoori:-** waxaan soo jeedinayaa anigu in ajendaha lagu daro:-

- Shirka London, waana tan ugu muhiimsan oo in waxa ugu horeya laga dhigaa
- Sidoo Qiimeynta xaalada dalka iyo dagaalada bariga ka socda iyana waa in wax laga yidhaahdaa oo la isaga yimadaa, intaas ayaan ku soo koobi.

**16. Md. Cumar Axmed Saleban (Sanweyne):-** inteynaan odhan waxbaa khariban horta inagu aan isa saxno, xaalada dalku marayo xukuumada ka msuula ah, markaa waxaan soo jeedin lahaa xeerar badan baa diyaara ah sida kii Nabadgalyada Wadooyinka iy Qaar Madaxweynuhu inagu soo celiyay marka xeerarka diyaarka ah aan muhiimada badankoodu siino oo aan horeysiino, waad mahadsantihiin.

**Gabagabo:-** dooda ajendaha waxaa ka qeybqaatey 16 mudane, 11 mudane doodoodu waxay u badnayd in ajendaha lagu daro Qiimeynta Xaalada Dalku marayo, halka 5 mudane qabeen fikir ah in Xeerarka

Golaha horyaal muhiimada la siiyo, waxaa kaloo mudanayaashu badankoodu soo jeediyeen in ajendaha lagu daro xisaab xidhkii 2010 oo xukuumadu soo gudbiso.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha Waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada JSL**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee G/ Wakiilada JSL**